**Xeerka Madaxweynaha Jamhuuriyada lamba. 89 ee 4 Maarso 1968**

**Heshiiska isku Darka Dowladda Somaliya iyo Shirkadda Beerala ee Talyaniga Somalida (S.A.I.A. S.p.A)**

## MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

Kadib markii la arkay qod. 75 ee Dastuurka;

Kadib markii la arkay xeerka lamba. 303 ee 4 Nofember 1962 oo lagu soo daabacay Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda 21 Disember 1962, kabidda lamb 3 ilaa 12 kaas oo lagu ansixiyey lagana dhigay mid fulis ah taarikhda 3 Nofember 1962, Heshiiska oo si siman ay u galeen Dowladda Somaliya oo dhinac ah iyo Shirkadda Beeraha ee Talyani iyo Somali ah dhinaca kale, oo khuseeya la wareegidda hantida maguurtada iyo gurtada ah ee Shirkadda SAIS markii laga reebo hantida lagu carifay Heshiisa iyo qaabka hirgelinta howlaha SNAI;

Kadib markii la tixgeliyey fursada Dowladda Jamhuuriyadda Somaliya in ay sii wado ilaa iyo 5ta sano laga bilaabo 1 Maayo 1968, wada shaqeynta howlaha SNAI (Societa Nazionale Agricola Industriale S.p.A) si loo saaro sokorta aaga magaalada Jowhar iyo tallaba kale ee Dowladda in ay fuliso awoodeeda lagu aqoonsaday qod. 8 ee Heshiiskaas sare ku xusan in laga iibiyo shirkadda SAIS ilaa 1da Maayo1968 ugu yaaraan 60% ee saamileyga guud ahaan ee SNAI oo ay leedahay Shirkadda SAIS;

Kadib markii la tixgeliey fursad la helay iyo anfaca Heshiiskaan in la dhowro kadib markii laga reebo qeybaha oo si toos ah Heshiiskaani uu wax ka beddely, heshiiskaan oo lagu saxiixay magaladda Muqdisho ee ka dhexeysa Dowladda Somaliya iyo Shirkadda SAIS 28 Febarayo 1968;

Kadib markii la dhegeysta soo jeedinta Golaha Wasiirka;

Kadib markii la tixgeliyey aragtida Ku-Xigeenka Wasiirka Maaliyadda iyo Golaha Wasiiradaha.

## WAXAA LA SOO SAARAY

### Qod. 1

Waxaa la ansixiyey lana dhigay mid fulin ah laga bilaabo taarikhda la saxiixay ee 28 Febarayo 1968, Heshiiska isku dark a ah ee uu dhexeeya Dowladda Somaliya oo dhinac ah iyo Shirkadda Beeraha Talyani-Somali oo dhinac kale ah ahmiyadeeduna tahay habka wadashaqeynta dhinacyada ilaa iyo 1da Maay 1973.

### Qod. 2

Heshiika is darka oo qodobka sare ku xusan xeerka

Muqdisho, 4 Maarso 1968.

**Abdirashiid Ali Shermarke**

Rai'sul Wasaaraha
**Mohamed Haji Ibrahim Egal**

Wasiirka Maaliyadda
**Abdullahi Jire Dualeh**

Waxaa la arkay-lana diwan geliyey-diwaan lamba. 1 bogga 28
Muqddisho, 1 Abriil 1968.
Xisabiyaha Guud
**Mohamud Isse Salwe**

## HESHIISKA ISKU DARKA

Sanadka 1968 maalinta 28 Febarayo waxaa dhex maray.

Dowladda Jamhuuriyadda Somalida oo ay wakiil ka yihiin Mudane Haji Farah Ali Omar, Ku-Xigeenka Guddomiyaha Golaha Wasiiradaha iyo Wasiirka Maaliyadda

Iyo

Shirkadda Beeraha Talyani-Somali (SAIS-SpA) oo ay wakiil ka yihiin Guddomiyaha Avvokato Luigi Bruno, Wakiilka la igmada ee SAIS, Dr. Dino Gardini sida lagu go'amiyey kalfadhiga Guddiga Maamulka ee SAIS ee taarikhda 12 Febarayo 1968.

### Ballan Qaad

Waxaay dhinacyada heshiiskaballan qaadeen in heshiiskaan u dhexeyay Dowladda Somaliya ee 3 Nofember 1962 oo la ansixiyey laguna fuliyey Xeerka Madaxweynaha Jamhuuriyada ee 4 Nofember 1962 lamba. 303 oo lagu faafiyey Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda kabbidiisa lamba. 3 ilaa 12, iyo Shirkadda SAIS (Societa'Agricola Italo-Somala, SpA) oo saldhigeeda yahay Muqdisho waxaa la caddeyey in muddada u dhexeyo in la nidaamiyo wadashaqeynta dhinacyada heshiiksa, xiriirkta wax soo saarta ee Shirkadda SNAI (Societa Nazionale Agricola Industriale SpA) oo ay leedahay shirkadda SAIS S.p.A ee aaga Jowhar.

Iyadoo la tixgeliyey howlaha sida joogtada ah loo haayey ee dhinaca teknikada iyo maamulka ee Shirkadda SAIS ay u haysay SNAI si loo gaaro yoolkeeda wax soo saarka iyo horumarinta soo saarka sonkorta ee SNAI iyadoo la dhowri doono halka ay uguga jirto maamulka shirkadda.

In Dowladda Somaliya oo ogeysiisay shirkadda SAIS in ay ka noqon doonto awoodeeda lagu carifay qod. 7 ee Heshiiska ku taarikhsan 3 Nofember 1962 in la iibsado ilaa iyo 1da Maayo 1968 ugu yaraan 60% ilaa saamiga SNAI oo dhan saamigaasi oo ay leedahay shirkadda SAIS, waxaa kale oo muhim ah in Heshiiskaani uu noqdo mid asal ah oo loogu yeeri doono "Heshiiskii asalka ahaa" iyadoo qodobadiisi ahaan doonaan kuwa rasmi ah midka laga reeba kuwa sida cad wax loogaga beddeley.

### Qod. 1

Hordhacu wuxuu dhinac ka yahay Heshiiskaan.

### Qod. 2

Laga bilaabo 6da bilood kadib markii Heshiiskaani la saxiixay ilaa iyo 1da Maay 1973, Dowladda Somalida waxay xaq u leedahay in ay ka iibsato SAIS 60% saamiga ama ilaa iyo saamiga oo idil ee shirkadda SNAI oo ay leedahay shirkadda SAIS, qiimaha iyo qaabka ay ku suggan tahay.

Dowladda Somaliyeed waa in ay ogeysiisaa Shirkadda SAIS in ay ku dhaqaaqi doonto isticmaalka awooda ku qoran faqradda sare ku xusan muddo lix bilood ka hor muddada ay awoodasi hirgeli doonto.

Sidoo kale Dowladda Somaliya, iyadoo aqoonsatay calamooyinka as aasidda shirkadda SNAI haddii ay doneyso in cid saddexaad siisyo qaar ama gebi ahaan saamiga shirkadda SNAI, in ay laga bilaabo taarikhda Heshiiskaan ilaa 1da Maay 1973 xaqqa iibista ee saamiga la doonayo in la iibiyo, xuquuqdaasi oo shirkadda

SAIS ay fulin doonto ama ay diidi doonto muddo 3 bilood ilaa iyo intii qoraalka beeca laga heelayo.

**Qod. 3**

Haddii Dowladda garato in ay fuliso awoodda ku qoran qod. 2, qiimaha saamiga oo u dhigma qiimaha ugu yar ilaa iyo intii wareejinta qiimaha –pro-quota- qiimaha keydka iyo hantida kuwa ku qoran misaaniyada oo la qeybinin oo heerka misaniyadda sanadka socda.

Bixinta lacagta waxaa lagu dhiibi doona kash oo lacag loo xawili karo dibedda oo leh qiimaha hadda jira ee u dhigma Lire 87.50 hal shillin.

**Qod. 4**

Iyadoo la arowsanaya in kalfadhiga Golaha SNAI, dhinacyada la isugu yeeray in ay ansixiyaan Misaaniyada sanadka ku eg 31 Disember 1967 soo jeedinta Golaha in la go'amiyo kor u qaadista Hantida Guud 30.000.000 ilaa 50.000.000 Sh. So taas oo ku imaan karto kadib markii lacagta Hantida Guud laga soo bixiyo Keydka Aan caadi ahayn ee Misaaniyadda SNAI, codka "Keydka Qalabka", intaas wixii ka dheer laga soo bixiyo Misaaniyada sanad laha la xiray 31 Disember.

Dowladda Somalida waxay u sahli doonta canshuurada ku waajiba sida ku cad qod. 14 ee Sharci lamba. 10 ee 18 Febarayo 1960 ee malgashi dibedda, sida ku xusan qod. 12 ee Heshiiska asalka ah. Sidoo kale sida ku qoran qod. 12 ee Heshiiska asalka ah, Dowladda Somali waxay siin doonta fursad la mid ah midda ku tilmaaman qod. 14 ee Sharciga lamba. 10 ee 18 Febarayo 1960 ee malgashiga dibedda. Arrinta ka reebidda canshuurta 10sanadleh oo ay SNAI codsatay looguna oggoladay go'aanka Wasiirka Maaliyadda lamba. 5372 ee 13 Disember 1967 iyo lamba. 5531 ee 25 Disember 1967 qiimaha ahaan 50% ee canshuurta laga bilaabo sanadka canshuurta ee 1968 (sanadkii la soo dhaafay 1967) iyo dhammadka sanadka 1977 (sanad maliyeedka 1976).

**Qod. 5**

Dhinacyadu waxaay ku heshiiyey in SNAI ay raadiso habkii ay u kor ugu qaadi lahaa xaaladda dhaqaalaha, si loo gaaro horumarin dhinaca maalgashita iyadoo lacag deyn ah oo waqti dheer/ dhexe lagu soo gudo, taas oo u baahan doonto heshiis gaar ee u dhexeyaa SNAI iyo Dowladda Somali.

Iyaddo la garowsday dhibaatada xisaabaadka ee Shirkadda, dhinacyadu waxay ku hesiiyeen in la dedejiyo qeybinta faa'idada saamiyleyda (Dowladda Somalida iyo SAIS oo u bislaatay si toosna loo oggoladay kalfadhiyada sanadyada 1965-1966 iyo dhoofinta faa'idooyinka bislaaday oo loo oggoladay

**Qod. 6**

Arrimaha khuseeyad faa'idooyinka bislaaday sanadka 1967 oo lagu go'aamidona kal fadhigga oo sida xigxigta ku kulmi doono ilaa iyo sanadka 1973, shirkadda SAIS waxaa lagu heshiiyey maalgelinta Somalia ee horumarin dhaqaale, warshadeed iyo mid 'seddexeye ah" oo 50% ee qiimaha SNAI loo qeybin doono SAIS hab faa'idooyin ah. Malgashi waxaa lagu dabaqi doona amarradda ku qoran sharciga lamba. 10 ee 18 Febarayo 1960 ee ku saabsan malgashi dibedda.

**Qod. 7**

Sida lagu carifay qod. 13 ee Heshiiska asalka ee caddeynta wiimaha sokorta, si loo gaaro maamul guud ee SNAI, dhinacyadu waxay ku adkesteen in la haayo

horumarinta dhaqaalaha oo hab qorsheysan oo lagu kordhin karo wax soo saarka oo waafaqsan ahmiyada guud ee isku daridda oo lagu tilmaamay heshiiskan.

Haddii asbaabo aan ku xirneyn SNAI ay socon weyso howlaha iyo dhaqaalaha shirkadda, Shirkadda SAIS waxay codsan karta Dowladda Somaliya in ay kala baxdo qeybteeda sida ku qoran qod. 3 ee Heshiiskan. Haddii muddada 6 gudahooda ee codsigaasi Dowlada Somalida ay fulin weydo iibsashada, shirkadda SAIS.

**Qod. 8**

Dhinacyadu waxay ku heshiiyeen in SNAI ay fursad – kadib markii ay Dowladda codsato-siiso dhinaca wada shaqeynta si loo gaaro yoolalka horumar dhinaca siyaasadda dhaqaalaha guud ahaan ama baahi tirka dalka gudahiisa.Waxaa muhim ah in wax soo saarka shirkaddu ay la jaan qaadi karaa si wada jir laah Maamulka SNAI in la fuliyo howlaha wax soo saarka shikada.

**Qod. 9**

Xal ka gaarista wax allaliyo wixii khilaaf ah ee ka dhex dhasho dhinacyada, waxaa la isticmaali doonaa heshiis laga dhex dhaliyo dhinacyada si loo gaaro tafsiirka, dabaqidda iyo fulinta qodobada ku qoran Heshiiskaan.
Haddii muddo 90 beri maalintii dhinac ka mid ah ay horgeysay dhinaca qoraalka dhibaatada dhex taala, oo laga gaari waayey wax heshiisa, waxaa arrintaasi la horgeyn doona guddi gar-qaadista oo lagu carifay sharciga lamb 11 ee 8 Febarayo 1967 oo lagu faafiyey Faafinta Rasmiga ee 4 Abriil 1967, kaas oo Dowladda Somaliya ay ku ansixisay "Heshiiska xalinta muranka arrimaha malgeshiga ee Dal iyo muwaadin Dowlad kale".

Sidas awed Dowladda Somalida waxay caddeysa in la dabaqi doono Shirkadda SAIS, sida ku tilmaaman faqradda 2/B ee qodobka 25 ee Heshiiska sare ku xusan oo awoodda shari la siiyey Xaruunta Caalamiga ee xalinta khilaafaadka la xiriira malgelinta. Wixii mas'uuliyada ee ka soo arooray Heshiiskaan, wixii khilaaf ah ee u dhexeyaa Dowladda Somalida iyo SAIS waxaa loo gudbin doonaa Xarunta laftigeeda sida la caddeyey faqradda 2(b) ee qodobka 25.

Isla guddiga gar-qaadista waxaa la tiigsan doona haddii ay dhacdo arrimo aan la filaneyn, ama murug leh ee dhinac suqyada lacaga oo aan si sahlan u fulin doonin ujeedada qodobada Heshiiskaan.

Waa la akhriyey, lana saxiixay laba nuqul oo asal ah.

Dowladda Somaliya
Ku-Xigeebka Guddomiyaha Golaha Wasiiraddaha
Iyo Wasiirka Maaliyada
**Mud. Haji Farah Ali Omar**

Shirkadda Agricola Italo Somalo ee SAIS
Maamulaha La igmaday
**Dr. Dino Gardini**